



Ummaddayda dhamanteed waa laga cafin dambiyada kuwa xumaanta muujista maahee

Abii Hureyra -Allaha karaali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- yaan ka maqlay isagoo dhahaya: "Ummaddayda dhamanteed waa laga cafin dambiyada kuwa xumaanta muujista maahee, qofku inuu danbi muujisto waxaa ka mida in ninku habeenkii danbi sameeyo oo waagu u baryo isagoo Ilaahay asturay markaasuu oron waarr hebelow shalay waxaan suubiyyey caykaas iyo caankaas xalayna wuxuu baryey isagoo Rabigi asturay, wuxuuna waa bariistay isagoo asturkii Ilaahay iska faydaya.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-wuxuu cadeeyey qofka muslimka ah, ee dambaaba waxaa loo rajaynayaa cafinta Ilaahay iyo dambi dhaafkiisa, marka laga reebo midka cadaysta macsida oo ku faanaya si xishood la`aana, kaasi ma mudna in la cifiyo, isagoo habeenkii macsida suubiyyey ayaa waagu u baryaa isagoo Ilaahay asturay, isagaase cid kale uga sheekheya inuu macsi sameeyey shalay, ilaahay ayaa habeenkii asturay, subuxiina isagaa iska qaaday asturkii Ilaahay!!

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3756>